

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA  
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO  
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية  
مكتب تيو لتوثيق العقود  
والإستشارات الشرعية  
مقديشوا - الصومال

**SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA  
(RAASAMAAL SERVICE)**

**(ARTICLE OF ASSOCIATION)**

**MUQDISHO SOOMAALIYA**

**2022**



**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **07/02/2022**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid Mudanaha hoos ku Xusan:-

**ABDULSHAKUR AHMED MOHAMED** lehna Baasaboorka Lambarkiisu yahay **P01023757** kana soo baxay Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaaliya.

Mudanaha magaciisu kor ku xusan yahay Wuxuuna I waydiistay inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo kambani leh qodobada hoos ku qoran:-

**QODOBKA 1AAD**  
**MAGACA KAMBANIGA**

Mudanaha aan kor ku soo sheegnay waxaa uu sameystay Sharci Shirkad lagu magacaabo (**RAASAMAAL SERVICE**) oo ah kambani gaar loo leeyahay (Private Company) shaqadeeduna tahay arimaha dhulalkas.

**QODOBKA 2AAD**  
**WAQTIGA LA' AASAASAY KAMBANIGA**

Kambaniga (**RAASAMAAL SERVICE**) waxaa la'aasaasay **2022** waxaana lagu aasaasay magaalada Muqdisho Caasimadda Soomaaliya.



**QODOBKA 4AAD**  
**NOOCA KAMBANIGA**

Kambanigani waa Kambani gaar loo leeyahay (sole proprietorship) waxaana ku soo biiri Kara Saamiley haddii uu ogolaado Milkiilaha Kambaniga

**QODOBKA 5AAD**  
**XARUNTA KAMBANIGA**

Xarunta Kambaniga waa Muqdishu caasimadda Soomaaliya Degmada H/wadaag, Xarumaha Kambaniga waa la kordhin karaa markii loo baahdo waxaana lagala xiriiyaa Milkiilaha Kambaniga, **ABDULSHAKUR AHMED MOHAMED Mobile:+252615206615.**

**QODOBKA 6AAD**  
**UJEEDDOOYINKA SHIRKADDA**

- 1- Dajinta qursho iyo maareynta naqshadaha cusub ee qurxinta dhismayaasha
- 2- Keydinta agabka dhismaha
- 3- Galidda heshiis yada laxiir dalabaadka dhulalka.
- 4- Qalabka iyo Farsamada guryaha.
- 5- Dhismaha Guryaha iyo waddooyinka Jayga ah
- 6- Qaadashada qandaraasyaada dhismaha iyo iibinta dhulalka banaan
- 7- Shaqo u abuurida dhalinyarada Soomaaliyeed.

**QODOBKA 7AAD**  
**HANTIDA IYO RAASIMAALKA KAMBANIGA**

Raasumaalka shirkaddu waa lacag dhan US \$5,000 (Shan kun oo doolarka Mareykanka ah) oo u kala qaybsanta 5 saami oo kiiba qiimahiisu yahay \$1,000 (Kun doolar).

No	Magaca	Saamiga	Qiimaha saamiga	Wadarta saamiga	Boqolkiiba
	<b>ABDULSHAKUR AHMED MOHAMED</b>	5	\$1,000	\$5,000	100%
	<b>Wadarta</b>	5	\$1,000	\$5,000	100%



**QODOBKA 8AAD**  
**SAAMIYADA KAMBANIGA**

Saamiyada Kambanigu waxay ka koobantahay 20 (SHAN BOQOL) saami oo magacaaban

**QODOBKA 9AAD**  
**GADASHADA SAAMIGA**

Marka ay kuu soo biiraan Saamile kasta waxaa uu xaq u leeyahay in uu gato saamigiisa marku rabo waana inuu u gudbiyaa Milkiilaha Kambaniga iyadoo qoraal ah, haddii looga gadan waayo muddo 90 maalmood ah, wuxuu u madax banaan yahay in uu ka gato cidduu rabo. Saamiyada waa la kordhin karaa haddii loo baahdo saamiga islamarkaana saamile kasta waxaa uu xaq uleeyahay inuu kordhin karo saamigiisa .

**QODOBKA 10AAD**  
**QAYBSASHADA FAA'IIDADA IYO KHASAARAHA**

Faa'iidada iyo khasaaro wixii yimaado waxaa iska leh Milkiilaha Kambaniga **ABDULSHAKUR AHMED MOHAMED**

**QODOBKA 11AAD**  
**SHAKHSIYADDA QAANUUNIGA EE KAMBANIGA**

Kambaniga waxaa uu leeyahay xuquuq qaanuuni ah, haddaba Magaca Kambaniga ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida Kambaniga sida: gaadiidka, qalabka, dhulalka, guryaha, sumadaha ganacsiga iyo tiimbarayaasha.

**QODOBKA 12AAD**  
**QAAB DHISMEEDKA IYO MAAMULKA KAMBANIGA**

Maamulka Kambaniga wuxuu ka kooban yahay sidaan hoos ku qoran:-  
Maamule Guud ahna milkiilaha Kambaniga waa **ABDULSHAKUR AHMED MOHAMED**

1. Shaqaalaha kambaniga.

**QODOBKA 13-AAD**  
**GEERI AMA WAALLI KU TIMAADDA MILKIILAHA**

Haddii waalli ama geeri ku timaado milkiilaha Kambaniga waxaa saamigiisa lagu wareejinayaa dhaxaltooyadiisa sharciga ah ama ciddii kale ee maxkamadu u amarto.

**QODOBKA 14AAD**  
**MUDDADA JIRITAANKA KAMBANIGA**

Kambanigu waxaa uu jirayaa muddo dhan 60 sano mudada jiritaanka kambaniga wa la kordhin karaa haddii uu ogolaado milkiilaha kambaniga waana layareyn karaa

**QODOBKA 15-AAD**  
**BAABI'INTA KAMBANIGA**

Waxaa uu baaba'ayaa Kambanigu marka la helo qodobada soo socdo:-

1. Dhamaanshaha muddada jiritaanka Kambaniga.
2. go'aan baabi'in ee ka soo baxay guddiga maamulka.
3. Haddii Kambanigu uu musalafto. Islamarkaana ay u suurta gali weyso inuu shaqeeyo
4. Haddii uu soo baxo sharci baabinayo Kambaniga noocaan ah.

**QODOBKA 16-AAD**  
**KALA QAYBSIGA HANTIDA KAMBANIGA**

Waxa la magacaabayaa guddi farsamo oo soo aruuriya hantida Kambaniga ee deynta ku maqan iyo midda taala, isla markaasna la bixiyo xuquuqda lagu leeyahay Kambaniga iyadoo lagu saleynaayo xeerka iyo shuruucda lagu dhisay Kambaniga.

**QODOBKA 17-AAD**  
**WIXII LAGA WAAYO SHARCIGA DHISMAHA KAMBANIGA.**

Wixii aan ku qornayn sharciga dhismaha Kambaniga waxaa loo raacayaa xeerka Kambaniga iyo sharciga Kambaniga ee dalka u degsan.

**QODOBKA 18-AAD**  
**DHAQAN GALKA SHARCIGA DHISMAHA**

Sharciga dhismaha wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo milkiilaha Kambaniga .



**QODOBKA 19-AAD**

**TIRADDA BOGAGGA EE HESHIISKU KU QORAN YAHAY**

heshiiskaan wuxuu ku qoranyahay af-soomaali wuxuuna ka koobanyahay 19-qodob iyo 4-bog. Heshiiskaan waxaa ila saxiixay Milkiilaha Kambaniga, kadib markii uu akhristay, raalina ka noqday sida aan u qornay heshiiskaan, waana kan saxiixiisa hoos ku qoran:-

**ABDULSHAKUR AHMED MOHAMED**




**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

REP. 069/T.P.N/22, Tr. 07/02/2022, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan uu yahay Saxiixii runta ahaa ee milkiilaha shirkadda, waxaana laga Saxiixay asaga oo raali ah, caafimaad qaba, maskaxdiisuna taam tahay, cid khasabtayna aysan jirin ka dib markii loo akhriyey sharcigaan, waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee Nootaayada.

**NOOTAAYAHA**

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**



+252 612223788 | +252 615353330 ✉ [Nootaayotayo@gmail.com](mailto:Nootaayotayo@gmail.com)

📍 Barako Market , Near Waaheen Hotel Mogadishu, Somalia



## FOOMKA BIXINTA DOCUMENTIGA ORJINAALKA

REP.\_069/T.P.N/2022.

Tr, /\_0\_/2022,

Magaca qaadaha: →

Abnaxum Anisa Maxamed

Meeshuu deganyahay →

Waxaan

Telfoonkiisa: →

0612220077

SAXIIXA BIXIYAHA

SAXIIXA QAADAHA:

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

FG. Abnaxum anisa ayaa siiyey ay